
Talyaaniga

euaa
EUROPEAN UNION
AGENCY FOR ASYLUM

# WAXA AAD U BAAHAN TAHAY INAAD KA OGAATO SHARCIGA MAAREYNTA MAGANGELINTA & SOCDAALKA

Nooca B

## SHACABKA WADDAN SADDEXAAD OO LAGU HELAY KU NOOLAANSHA SI SHARCI DARO AH DAL KA MID AH EU+




SOMALI

# TUSMADA


Maxaad buug-yarahan u heleysaa? 3

Waa maxay Sharciga Maareynta Magangelinta iyo Socdaalka? 4

Waa maxay xuquuqdaada inta aad ku jirto habraaca AMMR? 5

Xagee ayaad joogeysaa inta aad ku jirto habraaca AMMR? 6

Maxaa lagaaga baahan yahay habraacan? -

Maxaad ugu qasban tahay inaad bixiso farahaaga iyo sawirkaaga? -

Waa maxay cawaaqibyada ka dhalan kara haddii aadan kasoo bixin waajibaadkaas? -

Maxay ka dhigan tahay xirnaan? -

Sideen ku ogaan karaa haddii la ii wareejin doono waddan kale oo EU+ ah? -

Intee in la'eg ayay qaadan kartaa? -

Maxaa dhici doona haddii aadan raali ka ahayn go’aanka wareejinta? -

Waa maxay waxa aad u baahan tahay inaad ka ogaato habraaca racfaanka (marka la’isku daro saamaynta hakinta iyo racfaannada maadiga ah) -

Waa maxay waxa aad u baahan tahay inaad ka ogaato habraaca racfaanka (marka saamaynta hakinta iyo racfaannada maadiga ah la kala saaro) -

Xogtee shakhsiyeed ayaa la ururin doonaa? -

Waa maxay xuquuqdaada la xiriirta xogtaada shakhsiyeed? -

## MAXAAD BUUG-YARAHAN U HELEYSAA?

Waxaa la ogaaday inaad ku sugantahay waddankan adigoon haysan oggolaansho, sababtan awgeed farahaaga iyo sawirkaaga ayaa la qaaday, macluumaadkana waxaa loo gudbiyay keydka Eurodac waxaana la ogaaday inaad mid ka mid ah:

-Horey ugu soo gudbisay codsi ilaalin caalami ah (sidoo kale loo yaqaan magangelin) waddan kale oo EU+ ah.

-Lagugu wareejiyay waddan kale oo EU+ ah oo aan ahayn waddanka aad hadda ku sugan tahay.

-Lagu dejiyay waddan kale oo EU+ ah iyadoo loo marayo barnaamijka dejinta Yurub ama mid qaran ama qaadashada bini'aadantinimo.

Maaddaama la ogaaday inaad lagaaga baahan yahay waddan kale oo EU+ ah, waxaa lagu soo geliyay habraac lagu go'aaminayo waddanka EU+ ee lagugu wareejin doono.

Dhammaan macluumaadka lagama maarmaanka ah waxaad ka heli doontaa buug-yarahan.

**Waxaad hadda ku sugan tahay Talyaaniga, kaasoo ah waddan ka tirsan EU+. Waddamada EU+ waa:**

27-ka Dowladdood ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czechia, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Republic of Ireland, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden iyo

4 waddan oo kale: Iceland, Liechtenstein, Norway, Switzerland.

# WAA MAXAY XEERKA MAAREYNTA MAGANGELINTA IYO SOCDAALKA?




Waddamada EU+ waxay isku raaceen sharci guud oo loogu magac daray Xeerka Maareynta Magangelinta iyo Socdaalka (AMMR). Sharcigan wuxuu ka caawiyaa go’aaminta waddanka mas’uulka ka ah baarista codsigaaga ilaalinta caalamiga ah. Sidoo kale wuxuu bixiyaa xeerar ku saabsan xaaladaha qof lagu wareejiyay ama lagu dejiyay waddan EU+ ah balse la ogaaday inuu ku suganyahay waddan kale oo EU+ ah isagoon heeysan haysan oggolaansho.

Haddii aad horey u gudbisay codsi ilaalin caalami ah waxaa laguu dammaanad qaadayaa in mid ka mid ah waddamada EU+ uu baaro codsigaaga laakiin ma dooran kartid waddanka EU+ ee mas’uulka ka noqonaya. Waddanka baaraya codsigaaga waxaa go’aaminaya xeerarka sharciga AMMR.

Haddii ay jiraan wax aad ka fahmi waydo buug-yarahan, waxaad weydiin kartaa sarkaal socdaalka ah.



Xilligan, waddamada EU+ waxay kaliya go’aaminayaan midkooda mas’uulka ka ah baarista codsigaaga ama haddii lagaa baahan yahay inaad ku sugnaato waddan kale oo EU+.

Haddii la go’aamiyo in waddan kale oo EU+ ah uu mas’uul ka yahay baarista codsigaaga, ama lagaa baahan yahay inaad ku sugnaato waddan kale oo EU+ ah, waxaa laga yaabaa in lagu wareejiyo waddankaas.

# XUQUUQDAADA INTAA AAD KU JIRTO HABRAACA AMMR



Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad codsato warbixin ku saabsan horumarka habraaca si loo go'aamiyo waddanka EU+ ee baaraya codsigaaga. Haddii aad rabto inaad codsato warbixin, waxaad la xiriiri kartaa hay'adaha adigoo iimayl u diraya cinwaankan:

unitadublino@pecdlci.interno.it




Waxaad xaq u leedahay inaad la xiriirto oo aad ogeysiiso Hay'adda Qaxootiga ee Qaramada Midoobay (UNHCR) talaabo kasta oo ka mid ah habraaca qaxootinimo.

UNHCR waxay ilaalisaa danaha iyo xuquuqda magangalyo doonka iyo qaxootiga.

Faahfaahinta halka lagala xidhiidhayo UNHCR iyo macluumaadka ku saabsan habraaca magangalyada waxa laga heli karaa wabsaaydka UNHCR. https://help.unhcr.org/

## XAGEE AYAAD KU SUGANAN DOONTAA INTA AAD KU JIRTO HABRAACA AMMR



- Waxaa lagaa rabaa inaad ku sugnaato waddankan illaa waqtigaas.
- Haddii hay'aduhu go'aamiyaan in waddan kale oo EU+ ah uu mas'uul ka yahay baarista codsigaaga, hay'aduhu waxay kuu diyaarin doonaan safarka waddankaas.

## MAXAA LAGAAGA BAAHAN YAHAY HABRAACAN?

Waa inaad:

- ✅ Soo bandhigtaa dhammaan dukumentiyada aqoonsiga si aad u caddeyso aqoonsigaaga.
  Haddii aad hore u haysatay dukumenti aqoonsi laakiin hadda aadan haysan, waa inaad weli u sheegtaa hay'adaha in dowladdu ku siisay mid markii hore.
- ✅ U sheegtaa hay'adaha wakhtiyada aad u safartay waddan kale oo EU+.
- ✅ U sheegtaa hay'adaha haddii aad ku sugneyd waddan EU+ adigoon haysan ogolaansho.
- ✅ U sheegtaa hay'adaha xubnaha qoyskaaga ee ku dhow ee ku nool waddankan ama waddan kale oo EU+.

**MUHIIM!** Sharcigu wuxuu kugu qasbayaa inaad bixiso farahaaga iyo sawirkaaga.

# MAXAAD UGU QASBAN TAHAY INAAD BIXISO FARAHAAGA IYO SAWIRKAAGA?




Hay’adaha waddankan waxay qaadi doonaan farahaaga iyo sawirkaaga. Xogtan, oo ay la socoto macluumaadkaaga aqoonsiga iyo macluumaad kale oo muhiim ah, waxaa loo gudbin doonaa keyd wadaagga Yurub ee loo yaqaan Eurodac.

Keydkan waxaa isticmaala dhammaan 31-da waddan oo EU+ ah kuwaas oo ka baaraandegi kara xogtaada si ay u helaan macluumaadkaaga. Haddii aad u guurto waddan kale oo EU+ adigoon haysan ogolaansho oo farahaaga mar kale la qaado, dhammaan xogtaada ku jirta Eurodac waxaa arki doona hay’adaha waddankaas.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan keydka Eurodac waxaa lagu bixiyaa buug-yare gaar ah.



# WAA MAXAY CAWAAQIBKA KA DHALAN KARA HADDII AADAN KASOO BIXIN WAAJIBAADKAAS?




Haddii aad u safarto waddan kale oo EU+ ah adigoon haysan ogolaansho ama aad codsi ilaalin caalami ah ka gudbiso waddan kale oo EU+ ah, waxaa suuragal ah in laguu soo celiyo waddanka EU+ ee mas'uulka ka ah baarista codsigaaga.

Haddii aad ku sugnaato waddan EU+ ah oo aan ahayn midka lagaaga baahan yahay inaad joogto, xorriyaddaada waa la xaddidi karaa, waxaana laga yaabaa inaad hesho taageero yar.

# MAXAY KA DHIGAN TAHAY XIRNAAN?

Xadhig macneheedu waa in lagu geeyo xarun gaara oo aadan si xor ah u socon karin. Masuuliyiintu waa inay haystaan sabab saxa oo ay kugu xidhaan. Waa inay hubiyaan in aan xal kale macquul ah laheyn xaaladaada. Hay'aduhu waxay qiimeyn doonaan xaaladdaada gaarka ah ka hor inta aysan gaarin go'aan. Sababaha loo haynayo waxay noqon karaan, tusaale ahaan:



- maad ixtiraamin waajibaadka inaad joogtid goob gaara, waxaana jirta halis ah inaad ka baxsatid mar kale iyo masuuliyiinta oo aan kula soo xidhiidhi karin
- waxaad heshaa ama heshay go'aan in laguu gudbiyo wadan kale oo EU+ ah kana masuula baadhista codsigaaga magan-galyo waxaana jirta khatar inaad baxsato ah kahor gudbinta
- waxaad keenaysaa halis amni.

Haddii lagu xiro, waxaad racfaan ka qaadan kartaa go'aankaas waxaana aad codsan kartaa gargaar sharci oo bilaash ah iyo wakiil sharci.

**MUHIIM!** Haddii aad u safarto waddan kale oo EU+ ah adigoon haysan ogolaansho, waxay kordhinaysaa khatarta in lagu xiro mustaqbalka.

## SIDEEN KU OGAAN KARAA HADDII LA'II WAREEJIN DOONO WADDAN KALE OO EU+ AH?

Haddii la xaqiijiyo in lagaaga baahan yahay inaad joogtid dal kale oo EU+ ah, waxa lagu siin doonaa **go'aan wareejin ah** oo sheegaya dalka EU+ ee laguu wareejin doono.

Haddii lagaaga baahan yahay inaad joogtid dalke oo EU+ ah, masuuliyiintu waxa laga yaabaa in aannay kaa qaadin wareysi gaar ah.

## INTEE IN LA’EG AYUU NIDAAMKU QAADAN DOONAA?



Isgaarsiinta u dhaxaysa waddamada badanaa waxay qaadataa ilaa **1 bil** .



Haddii waddan kale oo EU+ ah xaqiijiyo inuu baarayo codsigaaga, waxaa lagugu wareejin doonaa **6 bilood gudahood** laga bilaabo taariikhda ay aqbalaan codsiga wareejintaada.



Haddii aad hadda **xiran tahay ama mustaqbalka lagu xiro**, kiiskaaga waxaa **loola dhaqmi doonaa si degdeg ah**. Wareejintaadu waa in lagu abaabulaa **5 toddobaad gudahood.** Haddii wareejintu aysan dhicin 5 toddobaad gudahood, waa lagaa sii deyn doonaa xabsiga. Hase yeeshee, wareejintaadu weli waa la qaban doonaa **6 bilood gudahood** laga bilaabo taariikhda uu waddanka EU+ ee mas’uulka ahi aqbalo codsigaaga.

Haddii aad ku jirto xabsi dambigaad ka gashay darteed, muddada wareejinta waxaa **la kordhin karaa ugu badnaan ilaa 1 sano**.




**MUHIIM!** Haddii aad baxsato, is qarisid ama aadan la shaqeyn hay’adaha abaabulaya wareejinta, **muddada wareejinta waxaa la kordhin karaa illaa ugu badnaan 3 sano**.

## MAXAA DHACAYA HADDII AAD DIIDID GO'AANKA WAREEJINTA?



Haddii la go'aamiyo in waddan kale oo EU+ ah inuu mas'uul ka yahay baaritaanka codsigaaga, waxaad heli doontaa **go'aanka wareejinta.** Go'aankan ayaa ku wargelin doona waddanka laguu wareejinayo.

Haddii aad ka soo horjeedo go'aanka wareejinta, waxaad maxkamadda u gudbin kartaa sababahaaga. Kani waxaa la yiraahdaa racfaan sare. Marka aad racfaan gudbiso, maxkamad ama guddiga garsoorka ayaa samayn doona go'aanka kama dambaysta ah.

Waxaa jira saddex sabab oo kaliya oo lagu codsan karo go'aanka wareejinta:

- Waxaad sheegaysaa in ay ka hor imaaneyso xuquuqdaada aadanaha haddii laguu wareejiyo dalkaas EU+ ka ah.
- Waxaa jirta macluumaad cusub oo aan la heli karin waqtiga go’aanka wareejinta, kaas oo saameyn lahaa go’aankaas.
- Qoyskaaga ayaa jooga dal kale oo EU+ ah oo aad rabto in lagula midoobiyo badalkeed.



Haddii aadan awoodin inaad sameysato qareen kuu gaar ah, waxaa lagu siin doonaa qareen kaa caawiya racfaanka adigoon wax kharash ah bixin.

Inta lagu jiro habkan, waxaad heli doontaa turjubaan ku hadla luqad aad fahmi karto.

## WAA MAXAY WAXA AAD U BAAHAN TAHAY INAAD KA OGAATO HABRAACA RACFAANKA (MARKA SAAMAYNTA HAKINTA IYO RACFAANNADA MAADIGA AH LA KALA SAARO)

Xadidida waqtiga, meesha iyo sida loo gudbiyo racfaanka waxaa lagu sharxi doonaa go'aanka wareejinta ee lagu siiyay.

Waa inaad sheegtaa sababta ama sababaha aad uga soo horjeedo go'aanka laguu wareejinayo dal kale oo EU+ ah.

Waa inaad sheegtaa sababta ama sababaha aan laguugu wareejinayn dalka EU+ ah ee u xilsaaran baaritaanka codsigaaga inta racfaankaaga lagu jiro.

Maxkamadda ayaa marka hore go'aamin doonta haddii aad sii joogi karto waddankan inta laga sugayo natiijada racfaanka, muddadaas oo socon karta ilaa **1 bil.**. Tani waxaa loo yaqaan racfaanka leh saamaynta joojinta

Haddii maxkamaddu go'aansato inaadan sii joogin waddankan inta natiijada racfaanka la sugayo, waxaa lagugu wareejin doonaa dalka EU+ ee mas'uulka ka ah baaritaanka codsigaaga.

Haddii maxkamaddu go'aansato in laguu ogolaado inaad sii joogto waddankan inta racfaanka la sugayo, maxkamaddu waxay isku dayi doontaa inay go'aan kama dambays ah ka gaarto 1 bil gudahood laga bilaabo taariikhda go'aanka saamaynta joojinta.

Haddii racfaankaaga la diido, waxaa laguu wareejin doonaa dalka EU+ ee mas'uulka ka ah baaritaanka codsigaaga. Wareejinta waa in la sameeyaa 6 bilood gudahood laga billaabo taariikhda go’aanka kama dambaysta ah.

Haddii aad hadda xiran tahay ama mustaqbalka lagugu xiro xabsi, kiiskaaga waxaa loo tirin doonaa mid degdeg ah. Wareejinta waa in lagu habeeyaa 5 todobaad gudahood. Haddii wareejinta aan lagu samaynin 5 todobaad gudahood, waxaa lagaa sii dayn doonaa xabsiga. Hase yeeshee, wareejinta weli waa la qorsheynayaa 6 bilood gudahood laga billaabo taariikhda dalka EU+ ee mas'uulka ah uu aqbalay codsiga wareejinta.

**MUHIIM!** Waa inaad la shaqeyso maamulka oo aad u safartaa wadanka EU+ ka ah ee baaritaanka codsigaaga mas’uulka ka ah.

## XOG GAARA OO NOOCEE AH AYAA LA URURIN DOONAA?



Shaqaalaha ku sugan dalka EU+ ee aad joogto waxay ururin doonaan macluumaad gaar ah oo ay ka mid yihiin:

- Faahfaahintaada gaarka ah iyo kuwa xubnaha qoyska kula socda (magaca, dhalashada, taarikhda iyo goobta aad ku dhalatay). Haddii aad hore u isticmaashay magacyo ama faahfaahin kale oo kala duwan, way ku weydiin doonaan.
- Macluumaadka ku saabsan aqoonsigaaga iyo dukumiintiyada safarka.
- Macluumaad kale oo xaqiijin kara aqoonsigaaga, sida farahaaga.
- Faahfaahinta xubnaha qoyskaaga ee ku nool dal kale oo EU+ ah (faahfaahinta gaarka ah, xiriirka ugu dambeeyay, halka ay joogaan, iyo xaaladdooda sharci).
- Faahfaahinta dukumiintiyada kuu suurtageliyay inaad ku noolaato dal EU+ ah haddii ay ku khuseyso.
- Macluumaadka dukumiintiyada muujinaya inaad wax ku baratay dal EU+ ah muddo ka badan hal sano.
- Macluumaadka ku saabsan dalalkii aad soo martay si aad usoo gaarto waddankan.
- Xaaladahaga shaqsiyeed.
- Taariikhda codsiyadii hore ee aad u gudbisay ilaalinta caalamiga ah iyo natiijadii ka soo baxday codsiyadaas.

## WAA MAXAY XUQUUQAHAAGA LA XIDHIIDHA XOGTA GAARKA AH?

Waxaad xaq u leedahay inaad aragto dhammaan xogta aad u gudbisay maamulka.

Haddii aad aaminsan tahay in qaar ka mid ah xogtaada shakhsiyeed ay khaldan tahay ama si aan sharci ahayn loo farsameeyay, waxaad codsan kartaa inaad aragto xogtaada adigoo la xiriiraya maamulaha xogta si aad u weydiisato in xogta khaldan la saxo ama xogta si sharci darro ah loo farsameeyay la tirtiro.

Waxaad la xiriiri kartaa maamulaha xogta ee waddankaan adoo adeegsanaya macluumaadka hoose.

Wasaaradda Arrimaha Gudaha

# QORAALADAYDA

Buug-yarahan waxaa loogu talagalay ujeedooyin macluumaad oo keliya. Keligii ma abuuro xuquuq ama waajibaad Hay'adda Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa bixisay qaybta ugu weyn ee agabkan, waxaana EUAA kaliya oggolaatay in la nuqulo ama wax laga beddelo buug-yarahan Waddamada Xubnaha ka ah EU. EUAA ma qaado wax mas'uuliyada ama xil ku saabsan saxsanaanta, nuxurka, dhameystirnaanta, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay bixiyeen Waddamada Xubnaha ka ah EU ama dhinac saddexaad oo mas'uul ah. EUAA iyo cid kasta oo ku shaqaysa magaca EUAA midna mas'uul kama aha isticmaalka laga yaabo in laga sameeyo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Hay'adda Midowga Yurub ee Magan-galyada, 2025